Dalbashada si aad ugu darto ku tiirsane qof wayn ah taageerada magangalyo-doonkaaga – liiska warbixinta

Oktoobar 2010

Somali

Haddii immika ay kuu socoto taageero magangalyo-doon (Waagii hore NASS) ood ka hesho Xafiiska Arrimaha Gudaha (UK Border Agency) oo odaygaaga, islaantaada, ama qofka aad wada jirtaan uu kaaga soo biiray Scotland, waxa laga yaabaa inaad ku darto taageerada aad hesho isagoo qof wayn oo ku tiirsane ah.

Si kastaba, si aad ugu darto qof wayn oo ku tiirsane cusub ah taageerada magangalyo-doonkaaga, Xafiiska Arrimaha Guduhu wuxuu kaa rabaa dokumentyo cayiman. Dalabyada la gudbiyo dokumentyadan la'aantood waxay u dhaw dahay inay fashilmaan.

Markaad ururiso macluumaadka hoos ku cad ku soo noqo xafiiskyaga Scottish Refugee Council ballan ayaanannu kuu qaban doonaa.

Ogow in ku darista qof wayn oo ku tiirsane ah taageeradaada macnaheedu aanu **ahayn** inay kuugu dareen andacoodkaaga magangalyo-doonka. Waxaan ku talinaynaa inaad markasta tan kala xaajooto wakiilkaaga sharciga, marka isbedelada xaaladaha qoyskaagu **laga yaabo** inay saameeyaan kiiskaaga haajiridda.

Dokumentiska liiska warbixinta

Liis warbixineedka soo socdaa wuxuu kaa caawin doonaa inaad u ururiso dokumentiska la rabo dalabkaaga. Markaad ku soo noqoto xafiiskayaga nooga keen qaybaha dokumentiska inta ugu badan ee aad karto si codsigaagu fursad fiican ugu helo in la oggolaado.

Magangalyo-doon

Xaqiijinta in adiga iyo lammaanahaaga lagu qoray andacood magangalyo-doon isku mida, sida:

- Nuqul macluumaad cusuba oo wakiilkaaga sharcigu u gudbiyey Xafiiska Arrimaha Gudaha kaasoo idiin aqoonsanaya adiga iyo lammaanahaaga qaar isku xidhan xagga andacoodka magangalyo-doonka
- Nuqul xogururin dhaxalka ah kaasoo faahfaahinaya isku tiirsanyaasha oo xaqiijinaya xidhiidhkiina
- Nuqul ka mida waraysigaaga baadhista/magangalyo-doonka ama kii lammaanahaaga oo magacaabaya midba midka kale

Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, (170 Blythswood Court), Glasgow G2 7PH Tel: 0141 248 9799, Fax: 0141 243 2499,
www.scottishrefugeecouncil.org.uk
Scottish Refugee Council is a charity registered in Scotland.
Registered Charity: SC008639

Xidhiidhka

- Haddaad isguursateen, nuqul ka mida shahaadada guurkiina
- Haddaydaan isguursan, dokumentiyo caddaynaya in adiga iyo lammaanahaagu aad wada noolaydeen **laba ka mida saddexdii saddexdii sano ee tagey,** sida:
    - Qaansheegta adeegyada aasaasiga ah oo labadiina magac ku yaalaan
    - Warqado ka socda adiga iyo lammaanahaaga oo ka yimid Xafiiska Arrimaha Gudaha (UKBA)
    - Waraaqo ka socda wakiilkaaga sharciga
    - Waraaqo ka socda xirfadle caafimaad
- Nuqul ka mida shahaadada dhalashada ilmahaaga taasoo caddaynaysa in adiga iyo lammaanahaagu lahaydeen xidhiidh socday muddo **laba ka mida saddexdii sano ee tagey**

Shaqaalaysiinta

Haddii lammaanahaagu uu ku shaqaynayey si sharci ah oggolaansho uu ka helay Dawladda UK, waa inaad bixisaa:

- Liis qoran oo ah loo shaqeeyeyaashii hore oo dhan, oo iskugu xiga siday u kala horeeyeen, isagoo ka bilaabmaya loo shaqeeyihii ugu dambeeyey
- Waraaqihii lacag bixinta saddexdii bilood oo u dambeeyey ama 12 waraaqo lacag bixineed toddobaadle ah, ooy ka mid yihiin tafaasiisha loo shaqeeyaha
- Dokumentiska P45 ama caddaynta dokumentiska kale ee ka yimid loo shaqeeyahooga kuwaasoo xaqiijinaya in shaqaalaysiintu istaagtay
- Lambarka Caymiska Qaranka
- Taariikhaha ay shaqeeyeen
- Nooca shaqada ay qabanayeen

Haddii lammaanahaagu shaqaynayey **isagoon/iyadoon** ka haysan oggolaansho Dawladda UK, waa inaad bixisaa:

- Liis qoran oo looshaqeeyeyaashii hore, oo u qoran siday u kala horreeyeen
- Taariikhaha ay shaqeeyeen
- Nooca shaqada ay qabanayeen

Haddii lammaanahaagu aanu **waligii** shaqayn waa inaad bixisaa:

- Sharaxaad ah siday naftoodu u taageeri jireen UK
- Waraaqaha saaxiibo taageeray, oo faahfaahinaya nooca iyo muddada ay socotay taageeradu, iyo sharaxaad ah sababta ay u wadi waayeen taageeridda

Ciwaanadii hore

- Liis qoran oo ah ciwaanadii hore ee UK halkaasoo lammaanahaagu joogi jiray, oo u yaala siday u kala horreeyeen oo ka bilaabmaysa ciwaankii u dambeeyey ee UK
- Sharaxaad qoran oo ah cidda lahayd guri kasta iyo haddaad lacag ka bixisay ku noolaashiisa

Xisaabta bangiga

- Bayaanka ugu dambeeyey ee bangiga oo, dhammaystiran ee lixdii bilood ee hore ee xisaabaadkii bangiga oo dhan ee adiga ama lammaanahaagu hayo
- Sharaxaada qoran ee wax kala iibsi wayn sida lacag u kala socotay xisaabaadka
- Waraaqaha ka socda qof kasta oo lacag ku shubay xisaabtaada oo xaqiijinaya inay sameeyeen dhigistan
- Waraaqaha ka socda qof kasta ood lacag kala baxday xisaabtiisa oo xaqiijinaya inay lacagtan adiga kaa heleen
- Waraaqo ka socda bangigaaga UK oo xaqiijinaya in la xidhay xisaabaadkii hore

Muhiim: waraaqaha aad bixinaysaa waa inay ku qornaadaan Ingiriisi. Si kastaba, haddii qofka ku siinaya waraaquhu aanu qori karin Ingiriisiga, waxaan ku talinaynaa inaad u soo kaxayso ballanta aad nala leedahay markaas waxaanu ka caawin inuu warqad kuu qoro.

Liisaska ciwaanada iyo goobaha shaqada warqadda ku magacaabani waxa lagu qori karaa luuqaddaada haddii aanad awoodin inaad ku qorto Ingiriisi.

Markaad xafiiskayaga timaad **waa inaad** keentaa dhammaan caddaymaha habboon ee ku qoran sare ee kula xidhiidha haddii kale ma awoodno inaanu dalabkaaga kaa caawino.